# Macluumaad Muhiim ah oo ku saabsan Shatiga Kumeelgaarka ah ee EIDBI

**Waaxda Adeegyada Aadanaha (DHS) waxay sannado badan la shaqaynaysay bulshooyinka, bixiyeyaasha adeegyada, iyo qoysaska si ay u sameeyaan talooyin ku saabsan faa'iidada EIDBI. Iyagoo ka duulaya talooyinkaas, sharci-dejinta Minnesota waxay meel mariyeen qodob sharci ah oo keeni doona in dhammaan hay'adaha EIDBI lagu soo hoos geeyo shati kumeelgaar ah dhammaadka sannadka2026.**

**Maxuu shatiga kumeelgaarka ahi qaban doonaa?**

- Waxay carruurta iyo dhallinyarada qaata adeegyada **EIDBI** u keeni doontaa ilaalin caafimaad iyo ammaan oo dheeraad ah
- Waxay abuuri doontaa qaab dhismeed shati oo lagu kormeero tayada, badbaadada, iyo hufnaanta adeegyada la bixiyo
- Waxay dejin doontaa tilmaamo cad, tababar, iyo heerar si ay hay'aduhu ugu fududaato bixinta adeegyo tayo leh
- Waxay hubin doontaa isla xisaabtan iyo in lacagta canshuur bixiyayaasha si hufan loo adeegsado

DHS waxay sidoo kale la shaqaynaysaa Guddiga Talo-bixinta ee EIDBI si loo sameeyo heerar shati oo dhammaystiran loona soo jeediyo sharci-dejinta marka la gaaro Janaayo 2027. Fursadaha ka qaybgalka hawshan waxa loo heli doonaa dhammaan daneeyayaasha. Si aad ula socoto wararka ku saabsan hirgelinta shatiga kumeelgaarka ah ee EIDBI, fadlan iska diiwaan geli wararka iimaylka adigoo adeegsanaya isku xirka.
hoose:https://public.govdelivery.com/accounts/MNDHS/subscriber/new?topic_id=MNDHS_584 ama koodhka QR ee hoose:

GovDelivery information email subscription

## Loogu talagalay Hay'adaha

- Bixiyeyaasha adeegyada MHCP ee hadda diiwaangashan waxay sii wadi karaan bixinta adeegyada inta lagu jiro kala-guurka shatiga kumeelgaarka ah.
- Waxa jira khidmad codsi oo dhan $2,100 ah shati kasta.
- DHS waxay bilaabi doontaa bixinta shatiga kumeelgaarka ah horraanta 2026.
- Iyada oo ku xidhan tirada codsiyada la soo gudbiyo, waxaa qaadan kara dhowr bilood ka dib markaad gudbiso codsigaaga ilaa inta aad ka heshid shatiga kumeelgaarka ah.
- Dhammaan hay'adaha jira waa inay soo gudbiyaan codsi ugu dambayn 31-ka Maayo, 2026.
- Hay'adaha aan codsan shati kumeelgaar ah marka la gaaro 31-ka Maayo, 2026, waa laga saari doonaa diiwaanka waxayna waayi doonaan awooddii ay adeeg ku bixin lahaayeen.
- Dhammaan hay'adaha waa inay cusboonaysiiyaan siyaasadaha iyo tilmaamaha la xiriira warbixinta xadgudubka, isla markaana hubiyaan in dhammaan shaqaaluhu tababar ku yeeshaan sida iyo goorta ay u gudbin karaan warbixin.
  – Cabashooyinka ku saabsan adeegyada iyo eedeymaha ku saabsan xadgudubka waa in si toos ah loogu soo gudbiyaa DHS ee carruurta (651-431-6600), iyo Minnesota Adult Abuse Reporting Center ee dhallinyarada da'doodu u dhexayso 18–21 (1-844-880-1574). (1-844-880-1574).

## Loogu talagalay Qoysaska iyo Ka-faa'iideystayaasha

- Haddii aad hadda ka heshid adeegyo hay'ad EIDBI, waa inaadan filan wax carqalad ah oo daryeelkaaga ah inta lagu jiro kala-guurka shatiga kumeelgaarka ah. Si kastaba ha ahaatee, hay'ad kasta oo EIDBI waa inay codsato shati kumeelgaar ah ugu dambayn 31-ka Maayo, 2026; haddii hay'addu aysan codsan, ma sii wadi karto bixinta adeegyada.
- Hadda waxaad si toos ah ugu soo sheegi kartaa cabashooyinka ku saabsan adeegyada iyo daryeelka DHS (651-431-6600) ee carruurta, iyo Minnesota Adult Abuse Reporting Center (1-844-880-1574) ee dhallinyarada 18–21 jirka ah. DHS waxay leedahay awood sharciyeed oo ay ku baarto cabashooyinkan.
- DHS waxay bixin doontaa fursado wadaagis si loo helo talooyin ku saabsan heerarka dhammaystiran. Haddii aad xiisaynayso ka qaybgalka ama rabto in laguu soo diro warbixinno cusub, fadlan iska diiwaan geli wararka iimaylka adigoo adeegsanaya koodhka QR ee ku qoran xaashidan.